



Iska barista COVID-19



Waa maxay is-baarida COVID-19 ee guriga?

Waa is-baaris degdeg ah (antigen) oo aad ku isticmaali karto guriga oo aad natiijooyin ku heli kartid mudo 15-30 daqiiqo gudahood. Waxaanu bulshada siinayna is-baarid bilaash ah si aan ugu fududayno kuwa uu sida aadka ah u saameeyay COVID-19 si ay isku baaraan marka ay u baahan yihiin oo ay uga caawiyaan ka hortagga faafitaanka.

Goorma ayaan isticmaalaa baaritaanka?

Isticmaal qalabkan baaritaanka xaaladaha soo socda:

- ◆ Haddii xiriir dhow ama qof qoyskaaga ka tirsan laga helo ama uu leeyahay calaamadaha COVID-19
- ◆ Shaqada ama dugsiyada - ka hubi shaqa bixiyahaaga/dugsiga si aad u aragto nooca baarista ay aqbalayaan.
- ◆ Kahor ama kadib kulamada qoyska, xafladaha, ama hawlaha fasaxyada
- ◆ Kulamada waaweyn ka dib sida ciyaaraha isboortiga ama adeegyada ku saleysan diimaha iyo safarka ka dib.

Is-baaris degdeg ah lagama aqbaloo xaaladahaan soo socda :

- Si loo buuxiyo shuruudaha safarka
- Si loo gaabiyo mudada karantiilka
- Galitaanka xarumaha u baahan caddaynta tallaalka

Maxaan sameeyaa haddii baaristeyda wax laga helo?

- ◆ Guriga joog oo is karantiil muddo 10 maalmood ah una sheeg dadka aad xiriir dhow la yeelatay
- ◆ **Haddii aad u baahan tahay** meel aad degto inta lagu jiro karantiilka wac xarunta wacitaanka COVID-19 ee Degmada King: 206-477-3977*
- ◆ Kaalmada raashinka, biilasha ama baahiyaha kale marka aad karantiilka ku jirto wac Isuduwidda Daryeelka: 206-477-8260*
- ◆ Wixii su'aalo ama cabasho ku saabsan caafimaadkaaga ama calaamadaha, la xiriir dhaqtarkaaga
- ◆ U soo sheeg natiijada baaritaanka Gobolka Washington Waaxda Caafimaadka : 1-800-525-0127*
- ◆ Booqo [kingcounty.gov/nextsteps](https://www.kingcounty.gov/nextsteps) wixii macluumaad dheeri ah.



*Caawinta luuqadda ee lambarrada taleefannada kore, sheeg luuqadda loo baahan yahay marka laguugu xiro koolka.

Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan baaritaanka booqo [kingcounty.gov/selftest](https://www.kingcounty.gov/selftest)

Ha isticmaalin baaritaankaan haddii aad natiijada baarista ka sugayso goobta baaritaanka. Sug natiijadaada oo raac hagida.